

Isbitaal ma soo joogaysaa?

Ha illaawin boorsadaada cagaaran!

Haddii aad daawooyin si joogto ah u qaadato waxaa fiican in aad dhammaantood ku haysato meel adag, oo kuu dhow.


Ma ogtahay in aad iminka heli karto boorso cagaaran oo bilaash ah oo aad ku haysato daawooyinkaaga dhammaantood?

Maxaa dheer, haddii isbitaalka lagu dhigayo, waxaad qaadan kartaa boorsadaada cagaaran si shaqaalaha isbitaalku ay u ogaadaan daawooyinka aad qaadato.

Waxay taasi ka dhigan tahay muddada aad isbitaalka ku jirto in:

- Aad sida caadiga ah ugu sii wadan karto qaadashada daawooyinkaaga
- Daawooyinkaaga lagu siihayo sida saxda ah (qiyaasta saxda ah waqtiga sax ah).
- Aad si nabad ah u qaadan karto wixii daawooyin cusub ah.

Boorsooyinka cagaaran waxaa laga heli karaa anbaalaasyada iyo farmashiisteyaasha isbitaalka. Taada ha illaawin in aad codsato.



Waa maxay daawooyinka habboon in lagu rido boorsada?

- Kiniinnada iyo kaabsallada
- Daawooyinka dareeraha ah
- Boomaatooyinka
- Qalabka neef qaadashada

- Buufiyeyaasha/kiniinnada GTN ee xanuunka cabburka (angina)
- Jaamaha
- Irbadaha
- Wixii ah daawooyin ama dheeriyo ee aad isticmaasho ee ka yimid farmashiistaha, dukaanka weyn ama fiqidduurre.